# HANAANKA XALINTA KHILAAFAADYADA DPA

## ARAR

Xalinta khilaafaadka waxey muhiim u tahay ilaalinta xogta iyo sir ahaanshiyaheyda, waa hab eey is ticmaasho hay`ada ilaalinta xogta dadweynaha si ay ugaarto xal qilaaf, iska hor imaad ama isfahmwaa la xariira adeegsi xog, ayadoo lamaraayo hanaan ka duwan hanaankii qaadista dacwadaha ee maxkamaddaha.

Ujeedada isticmaalka hanaankaan ayaa ah, fududeyn iyo qanacsanaan labada dhinac in la abuuro kaasoo ka qiima yar hanaankii dacwadaha maxkamadda qarashkii iyo waqtigii ku bixi jiray, xalinta khilaafaadyada hay`adaan waxey ku shaqeyn doontaa doorarka kala ah sulux, dhexdhexaadin, wadahadal iyo heshiisiin, iyagoo heli doona dhinacyada door isku mid ah iyo wadahadal dhinacyada oo dhan, isagoo hagi doono dhinac sadaxaad oo loo yaqaan xiriiriye ama dhex dhexaadiye.

---

## *1. MUXUU MUHIIM U YAHAY HANAANKA XALINTA KHILAAFAADYADA?*

---

Hanaanka xalinta khilaafaadyada wuxuu muhiim u yahay qodobada soosocda:

1. **waqtiga**

Habka xalinta khilaafaadyada, sida suluxa ama dhexdhexaadinta, ayaa si caadi ah uga degdeg badan hanaanka dacwadaha, wuxuuna ubadbaadinayaa qofka waqtigii dheeraa ee dacwadaha uga bixi jiray.

2. **Qiimaha**

Hanaanka xalinta khilaafaadyada wuxuu ka qarash iyo qiima yaryahay hanaanka maxkamaddaha isagoo meesha ka saaraya culeyska qarashka.

3. **Helida qubaro ku taqasusay ilaalinta xogta.**

Hanaankan wuxuu kaga duwanyahay hanaanka maxkamaddaha helida qubaro ku taqasusay ilaalinta xogta kuwaas oo galaya xalinta khilaafka, waxaana fududaane fahanka iyo go`aan gaarista dhinacyada.

4. **Badbaada xiriirka**

Hanaankaan wuxuu badbaadinayaa xiriiradii jiray khilaafka ka hor isago ka dhigaayo dhinacyada iney isku fahmaan khilaafka dhaxyaal.

5. **Sir ahaanshaha**

Hanaankaan wuxuu badbaadinayaa sir ahaansha xogta xasaasiga ah, isagoo meesha ka saaraya hanaankii maxkamadda ee ogolaanayay iney dadweynaha dhageystaan hanaanka dacwadda u socoto.

6. **Dabacsanaan/ isku jilicsanaan**

Hanaankaan wuxuu dhiira galinayaa, helida isu nuglaan, tanaasul iyo meel dhaxe in la isugu yimaado, isagoo meesha ka saaraya nidaamka adage e maxkamaddaha.

7. **Dhiiri galin**

Hanaankaan wuxuu dhiiri galinayaa, ku baraarugsanaanta ilaalinta xogta, in shaqsiyaadka iyo shirkadaha eey hor mariyaan ilaalinta xogta ay hayaan.

## *Habka xalinta khilaafaadyada ee DPA*

Habka qaadista xalinta khilaafka wuxuu u dhacayaa sida soosocota:-

- **Codsi soogaara DPA**

Shaqsi ama hay`ad ayaa codsi usoo gudbinaya hay`ada ilaalinta xogta dadweynaha, codsigaas oo ku saabsan xalinta khilaaf ka taagan ilaalin xog, iyagoo codsigooda ku cadeynaya nuuca khilaafka iyo faahfaahinta dhinacyada eey quseyso.

- **Qiimeyn iyo hubinta haboonaanta.**

Kadib codsiga soogaaray DPA, waxey hubineysaa inuu ku haboon yahay khilaafkaan, in lagu xaliyo hanaanka xalinta khilaafaadyada, iyadoo ka eegeysa sharciga ilaalinta xogta dadweynaha iyo iney ikhtisaas uleedahay.

- **Magacaabida xiriiriye ama dhex dhaxaadiye**

Kadib xaqiijinta in khilaafkaan lagu xalin karo hanaaanka xalinta khilaafaadyada, DPA waxey magacaabeysaa xiriiriye ama dhexdhexaadiye.

- **Diyaar garow iyo soo gudbinta macluumaadka.**

Kadib magacaabista xiriiriye ama dhexdhexaadiye, waxaa saran dhinacyada in ay usoo gudbiyaan xiriiriyaha ama dhexdhexaadiyaha dhamaan wixii quseeya khilaafkaan oo ah, documents, cadeemo, iyo wixii lamid ah.

- **Khabsoomida kulanka xalinta khilaafka**

Xiriiriyaha ama dhexdhexaadiyaha ayaa kulminaya dhinacyada iyagoo ka doodaya, falaqeynaya xalka ugu haboon eey qaadan lahaayeen ilaa eey isla qaataan go`aan eey isku waafaqaan.

- **Wada hadal iyo xal**

Inta lagu guda jiro wada hadalka, xiriiriyaha ama dhexdhexaadiyaha ayaa ka caawinaya dhinacyada fahamka sharciyada dalka oo ugu horeeyo xeerka ilaalinta xogta iyo xeer nidaamiyaasha hay`ada.

- **Qorida heshiiska**

Kadib wada hadal, dhinacyada waxyaabaha ay isku waafaqeen waxaa loo badalaa hab formal ah, waxaana laga dhigaa qoraal ku qoran luqad la fahmi karo, waxaana lagu cadeynaa qoraalkaas dhinac walba doorka uu leeyahay iyo tilaabooyinka loo baahanyahay in uu qaado.

- **Dib u eegis iyo fulin**

DPA waxey hubineysaa in uu waafaqsan yahay heshiiskan sharciyada u dagsan, iyo dhankastaba in aan la qasbin, dhamaan sharuudaha ku qoran heshiiska ee saran dhinacyada ineysan ka hor imaaneyn sharciga iyo bani`aadanimada.

- **Dib u hubin**

DPA waxey awood u leedahay hubinta waxyaabihii lagu heshiiyay in la fuliyay lana raacay heshiiskii, iyadoo la ilaalinaayo sharciga ilaalinta xogta dadweynaha.

- **Sir ahaanshaha**

Hanaanka xalinta khilaafaadka wuxuu muujinayaa sir ahaanshaha, wuxuuna damaanad qaadayaa dhamaan doodaha, wadahadalada iyo faahfaahinada la xariira khilaafka ee quseeyay dhinacyada iney ahaan doonan sir.

## 1. *Arimo gaar ah*

Laguma xalin karo hanaanka xalinta khilaafaadyada, hadii qilaafku yahay, mid quseeya danta qaranka, danta guud (sida caruurta, dadka maska ahaan naafada aha ama dadka dhamaan xubnaha muhiimka ah naafo kawada ah)